

Sinaanta Maal-gelinta Dugsiga

A CCS COMMUNITY TOWN HALL

7-da Maajo, 2025 | 6-ilaa 8 p.m., fiidnimo

Dugsiga Sare East High School

Ajandaha Caawa

Soo-dhawaada

Ebenezer Vasquez-Fuentes, Ardayga Dugsiga Sare ee South High School

Hadallo Kooban

Michael Cole, Guddoomiyaha Guddiga Wax-barashada

Dr. Angela Chapman, Kormeeraha Guud ee Dugsiyada Magaalada Columbus

Ryan Cook, Hanti-dhowrka Dugsiyada Magaalada Columbus

Hor-dhac

Ebenezer Vasquez-Fuentes, Ardayga Dugsiga Sare ee South High School

Dood-cilmiyeedka

Waxaa dhex-dhe-xaadinaysay Amelia Robinson, Tifa-tiraha Columbus Dispatch Editor



Munira Abdullahi

Wakiilka Gobolka Degmada 9-aad



Jennifer Adair

Guddoomiye Ku xigeenka Guddiga Wax-barashada



Beryl Brown Piccolantonio

Wakiilka Gobolka Degmada 4-aad



Hearcel F. Craig

Senator-ka Gobolka Degmada 15-aad



Latyna Humphrey

Wakiilka Gobolka Degmada 2-aad

Su'aalaha & Jawaabaha

Xiritaanka Hadallada & Wax ka Qabashada

John Coneglio, Madaxa CEA

Lois Carson, Madaxa CSEA

Maal-gelinta Mustaqbalkeena:

Sinaanta Taageerada

Maal-gelinta Dugsiga

Looguna talagalay Dugsiyada Magaalada
Columbus

Aynu Wada Jir U Dhisno Mustaqbal Xoog Leh!

Maxay Muhiim U Tahay:

Dugsiyada Magaalada Columbus waa degmada dugsi ee ugu weyn Ohio, oo u-adeegta in ka badan 47,000 oo arday. Hase yeeshee, waxaan sii wadnaa inaan wajahno caqabado sababtoo ah nidaamyada maal-gelinta oo duugoobay, oo sinaan-la'aan ah. Qaabka maal-gelinta gobolku waa inuu ka tarjumayaa qiimaha dhabta ah ee waxbaridda arday kasta.

Qorshaha Sinaanta Maal-gelinta Dugsiga waxaa loo sameeyay si loo hubiyo maaliyad badan oo loo siman yahay oo la saadaalin karo, laakiin si buuxda looma dhaqan gelin. La'aanteed, dugsiyadeenu waxa ay ahaanayaan kuwo aan la maalgalin oo ardaydeenu iyo bulshadeenu ay bixiyaan qiimaha.

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan Sinaanta Maal-gelinta Dugsiga, booqo www.policymattersohio.org.

***Si wadajir ah, waxaan ugu doodi karnaa
sinaan maalgelin ah oo hubineysa arday
kastaa inuu helo fursad uu ku guuleysto.***

Maxaa Loo Haya:

- **Mustaqbalka ardaydeena:** Dugsiyada aan la maalgalin waxay u horseedaan fasallo buux-dhaafa, agab duugoobay, iyo helitaanka barnaamijyada manhajka ka baxsan oo kooban.
- **Awooda Bulshadeena:** Dugsiyo horu-marsan ayaa dhisa bulshooyin horu-marsan. Maal-gelinta waxbarashadu waxay la macno tahay dhammaanteen oo leh mustaqbal ifaya.
- **Kobaca Ohio:** Nidaam waxbarasho oo sinaan ah, oo si buuxda loo maal-geliyey ayaa ka caawin doona u diyaarinta ardayda xoogga shaqada, hoggaaminta, iyo muwaadinimada dhaqaalaha adduunka.

Maxaad Qaban Kartaa:

1. **La xiriir Sharci-dejiye-Yaashaada:**
U sheeg inaad taageerto Qorshaha ah Sinaanta Maal-gelinta Dugsiga iyo maal-gelinta sinaanta ah ee dugsiyada dadweynaha ee ku jira miisaaniyada hawl-galka Ohio ee labadii sanaba mar.
2. **Kor u-Hadal:**
La wadaag sheekadaada warbaahinta, baraha bulshada, ama dhegeysiga dadweynaha ee miisaaniyadda dawladda. Codkaagu waa muhiim!
3. **Ka qay-bgal Shirarka Bulshada:**
Ku biir hoolalka magaalada, shirarka guddiga, iyo dhacdooyinka u doodista. La soco oo ka qayb qaado go'aamada saamaynaya ardaydeena iyo mustaqbalkeena.

Maanta Talaabo Qaad!

Booqo www.legislature.ohio.gov si aad u hesho sharci-dejiye-yaashaada oo u sheeg:

"Waxaan ugu baaqaynaa Golaha Guud ee Ohio inay gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah oo ay si buuxda u maalgaliyaan Qorshaha Sinaanta Maal-gelinta Dugsiga."